

## Xeerka Kadranka ah Isir Nacaybka

Gudigga Waxbarashada iyo Degmo Dugsiyeedka Magaalada Syracuse (Syracuse City School District) waxay diidayan dhammaan noocyada takoorka ee burburka ku ah shaqada, hiigsiga, mabaadii'da iyo yoolalka Degmada. Ujeedada xeerkaan waa in meesha laga saaro dhammaan noocyada isir nacaybka ee ka imaanaaya shaqada Degmada ee ku aadan xeerarka kale ee Gudigga.

Gudigu wuxuu diirada saarayaa mabaadii'da soo socota:

1. Abuurista iyo joogtaynta bulsho dugsi oo wadaagta masuuliyad wadareed si wax looga qabto, loo baabi'iyo, loogana hortago ficalada, go'aannada, iyo natijjooyinka ka imaanaaya sii hurinta isir nacaybka.
2. Baabi'inta falalka cadaalad darada ah iyo ka faa'iidaysiga hibooyinka, xirfadaha, iyo xiisayaasha gaarka ah ee cunug kasta si loo dhameeyo waxyaabaha bulshadu qiyaasta ku bixiso ama dhaqanka lagu saleeyo, sida isirkka, dabaqada nolosha, ama jinsiga, si ardaydu guul u gaaraan.
3. Qadarinta iyo hormuud u noqoshada kala duwanaanta iyo khibradaha nolosha ee dhammaan xubnaha bulshada si loo taageero shaqada, higsiga, mabaadii'da, yoolalka, iyo ahdaafta degmada dugsiga.
4. Qirista in isir nacaybka badanaa lagu muujiyo qaabab kale oo takoor ah, ayna ku jiraan, laakiin aanay ku koobnayn, noocyada sifoooyinka sharcigu difaacaayo ee lagu sheegay xeerka 3420 ee Mamnuucida Takoorka iyo Dhibaataynta.
5. Yaraynta farqiyada ka dhex jira deegaannada isirada kaladuwan ee ardayda dagan Degmada iyo shaqaalaysiinta shaqaalaha Degmada.
6. Baabi'inta farqiyada u dhaxeeya kooxaha isirada kala duwan oo uu ku jira dadaalka aqooneed ee ardayda, guushooda, iyo ka qaybgalka barnaamijyada waxbarashada; ayna ku jiraan: heerarka qalin jabinta, fursadaha waxbarasho ee casriga ah oo xawaare ku socda, ka qaybgalka koorsada, nashaadaadka ka baxsan manhajka, aqoonsiga waxbarashada gaarka ah, buundooyinka imtaxaanka caadiga ah, iyo heerarka ardayda dugsiga laga cayrsho.